

Waxaa la soo gaaray waqtigaa ilmahaaga u dalbi lahayd dugsiga

Halkaan waxaa ku qoran macluumaad loogu talo galay ardayga dhigta sanadka ugu dambeeyo dugsiga.

Waxaad u baahantahay inaa dalbato dugsiga aad rabto inuu ilmahaaga bilaabo. Waxaad dalban kartaa dugsigii aad ka rabto degmada gudaheeda. Doorashadaada waxaan u tixgelineynaa sida ugu macquulsan. Haddii dalabka uu ka bato boosaska la haayo markaas ardayda waxaa loo siinaa booska sida ay ugu kala dhowyihiin dugsiga.

shabakadeena orebro.se/sokaskola waxaad ka aqrisankartaa sida boosaska dugsiyada loo qeybiyo. Halkaan waxaa kaloo ka heleysaa liiska dugsiyada ku yaala degmada Örebro, kuwa degmada maamusho iyo kuwa gaarka ah.

Dalbo dugsiyada degmada maamusho 15 janaayo–31 janaayo

Markii aad go'aansatid dugsiga adiga iyo ilmahaaga aad daneyneysaan waxaad iska diiwaangelineysaan adeegeena elektarooniga ah. Waxaad dooran kartaa adoo kala hormarinaaya ilaa shan dugsii. Labada waalid ee mas'uulka ka ah ilmaha waa inay haystaan emeyl shaweynaaya iyo Bank-ID. Si codsiga ansax u noqdo waa in labada waalidba ay saxiixaan adeega elektrooniga ah ugu dambeyn 31 janaayo

Haddii aadan isticmaali karin adeega elektarooniga waxaad ku soo dalban kartaa foom waraaq ah. Foomka waxaa ka heleysaa orebro.se/sokaskola ama waxaad ka soo qaadanaysaa Servicecenter.

Adeega elektarooniga ha wuxuu furan yahay inta lagu guda jiro **xilliga dalbashada 15 janaayo–31 janaayo**. Haddii aad ku soo dalbanaysid foomka waraaqda ah waa inuu degmada Örebro soo gaaraa ugu dambeyn 31 janaayo ayna ku saxiixnaadaan labada waalid ee mas'uulka ah. Haddii kale ansax ma noqonaayo codsiga.

Ugu dambeyn dhamaadka maarso waxaa ku soo gaaraaya go'aanka ah dugsiga uu ilmahaaga bilaabaayo.

Intixaanka aqoonta maado qaas ah iyo dalabka dugsiga

Maadooyinka qaarkood oo qaaska ah ee faslada todobaad ardaygu wuxuu u baahan

yahay in imtixaan aqooneed laga qaado. Imtixaan aqooneedka waxaa la qaday deyrtii hore. Xitaa haddii ilmahaaga imtixaanka dhameysto waxaad u baahan tahay inaa dalbato dugsiga laga hadlaayo. Natiijada imtixaanka waxaa si toos ah loogu gudbinaayaa gudiga qaabilsan meeleynta ardayda dugsiyada hoose/dhexe.

Haddii ilmahaaga uusan sameynin imtixaan aqooneedka taasoo qasab ah inuu sameeyo dugsiga la rabo, waxaad toos ula xiriireysaa dugsiga uu quseeyo.

dugsiyada gaarka loo leeyahay

haddii aad rabto inaa dalbatid dugsiyada gaarka loo leeyahay dugsiga ayaad toos ula xiriireysaa, boosaskooda ayagaa maamula. Markaa dalbatid dugsi gaar loo leeyahay isla markaa waxaad dalban kartaa dugsiga degmada maamusho. Haddii markaa aad go'aansatid inaa dugsiga gaarka loo leeyahay aadid waa inaa la soo socodsiiisaa Servicecenter.

gaadiid ku qaadida ardayda

haddii ilmahaaga uu bilaabaayo fasalka 4aad dugsiga cusubna uu idin jiro wax ka badan afar kiilomitir wuxuu xaq u yeelan karaa in gaadiid lagu qaado. Haddii ilmahaaga uu bilaabaayo fasalka 7aad waa in dugsiga uu idin jiraa shan kiilomitir iyo wax ka badan. Masaafada waxaa laga bilaabayaa cinwaanka uu ilmaha ku diiwaangashanyahay ilaa iyo dugsiga ay degmada geysay ilmaha, xitaa haddii ardaygu doortay inuu aado dugsiga kale.

Waxaan kugula talineynaa markaad dalbanaysid iskuulka inaa la dalbatid in ilmaha gaadiid u baahanyahay. Markaa waxaad heleysaa go'aan ku saabsan qaaditaanka ilmaha intaa dugsiyada bilaaban. Gaadiidka dugsiga waa in la dalbadaa bilawga sanad dugsiiyeed walba.

Xarunta xilli firaaqada

Haddii ilmahaaga u baahanyahay dugsiga ka dib inuu sii joogo waxaad dalbanaysaa xarunta ilmaha lagu cayaarsiiyo xilliga waxbarashada ka dib marka aad hesho go'aanka dugsiga uu ilmahaaga bilaabi doono.

Halkaan waxyaabo badan ayaad ka ogaan kartaa

shabakada orebro.se/sokaskola waxaad ka aqrisan kartaa sida dugsiga loo dalbado waxaad kaloo ka heleysaa macluumaad ku saabsan gaadiidka dugsiga iyo xarumaha xilli faraaqada.

Waxaa kaloo la xiriir kartaa Servicecenter 019-21 10 00, servicecenter@orebro.se ama servicecenter@t-meeting.se (luqada ishaarada ama dhagoolaha).

In other languages

The information above is also available at our schools in Arabic, English, Finnish, Sorani and Somali. Contact your school or our Service Centre at 019-21 10 00 or servicecenter@orebro.se if you have any questions.